# Shahaado koroona oo la hubin karo ayaa diyaar ah 11-ka Juun

Shahaadada koroonaha ee waddanka gudahiisa lagu isticmaali karo waa diyaar 11-ka Juun. Shahaadada koroonahu waxa ay yeellan doontaa labo muuqaal: muqaal fudud oo waddanka gudahiisa lagu isticmaalayo iyo mid la isticmaalayo marka laga gudbayo xuduudaha aagagga Midowga Yurub iyo Aagga Dhaqaale ee Yurub (EØS).

Ilaalinta xogta qofka ayaa sabab u ah in shahaadada koroonaha labo nooc laga dhigo. Markaa qofku ma u baahna in uu bixiyo xog ka badan inta looga baahan yahay. Marka waddanka lagu isticmaalayo, waxa loo baahan yahay keliya in la soo bandhigo shahaado shaqaynaysa oo ma loo baahna macluumaad kale. Shahaadada koroonahu waxa ay ku jirtaa helsenorge.no, waxaana lagu soo dejisan karaa moobaylka ama waa la so daabacan karaa iyadoo warqad ah.

**Soo-jeedinta xeer ku saabsan shahaadada koroonaha**

- Dawladdu soo-jeedin xeer oo ku saabsan shahaadada koronaha ayay u gudbisay dhegaysi dadweyne. Waxannu rabnaa in aannu samayno nidaam la hubo oo lagu xaqiijin karo tallaalka la qaatay, tijaabooyinka cudurka laga waayey iyo difaaca qofku leeyahay kaddib markii cudurka koroonahu ku dhacay, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Xeerka waxa ka mid ah in Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelku awood u helayso samaynta xeer-hoosaadyo, si nidaamka shahaadada loo waafajiyo xeerarka Midowga Yurub. Stortinget – Golaha Baarlamaanka - ayaa go’aan ka soo saari doona soo-jeedinta xeerka, markaa haddii xeerku u soo baxo sida la filayo, waxa **ka hirgelinta waddanka gudahiisa** la bilaabi karaa 11-ka Juun. Waxa xilligaas la helayaa shahaado koroona oo leh QR oo la hubin karo xogteeda.

– Waa muhiim in aan hoosta ka xarriiqo in aan shahaadada koroonaha loo isticmaali doonin in dadka lagu xadido. Waxa loo sticmaalayaa in la sameeyo fududayn. Waxa tusaale ahaan la isticmaali karaa marka laga qaybgalayo qabanqaabo weyn oo aan markeeda hore la oggolayn in laga qaybgalo haddii aan la haysan shahaado, ayuu tilmaamay Høie.

**Shahaado koroone oo lagu isticmaalo dibeddaha**

Muqaalka kale ee shahaadada koroonuhu waxa uu suurtaggelinayaa in laga gudbo xuduudada aagagga Midowga Yurub iyo Aagga Dhaqaale ee Yurub (EØS). Nidaamka shahaadada ee  Yurub ka dhexeeya waxa uu diyaar yahay bilowga bisha Julaay. Dadka haysta shahaado Noorwiiji ah oo digitaal ah waxa ay isticmaali karaan xalka maanta jira marka ay soo gelayaan waddanka, laga bilaabo khamiis 3-da Juun saacadda 12.00.

- Midowga Yurub waxa uu qofka ka rabaa macluumaad dheeraad ah markuu ka gudbayo xuduudaha, waxaana loo baahan yahay in la kala saari karo tallaalka la qaatay, tijaabooyinka la iska qaaday iyo in xanuunku ku dhacay qofka. Waxa loo baahan yahay in la arki karo magaca tallaalka, tirada tallaalka iyo taariikhda tallaalka. Taas darteed waxa shahaadada ku jiri doona qayb loo isticmaali karo arrimahaas, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Dawladdu waxa ay weli dadka kula talinaysaa in ay iska dhaafaan safarrada aan loo baahnayn ee lagu tegayo dhammaan waddamada kale duwan. Talooyinka safarradu waxay sii soconayaan ilaa 1-da Julaay, dib-u-eegis ayaana lagu samayn doonaa wakhtigaas ka hor. Dadka safarka gelaya waa in ay sii ogaadaan xeerarka karantiilka iyo ka hortagga cudurka ee ka jira waddanka ay ku socdaan. Waddamadu way kala xeerar duwan yihiin.

**Socdaalka ka imanaya dibedda ee soo gelaya Norway**

Ilaa inta la gaadhayo 11-ka Juun waxannu bilaabaynaa xal ku meel gaadh ah oo keenaya in dadka socdaalka ah laga dhaafi karo hoteelka karantiilka, **laakiin ay karantiilka ku geli karaan guriga ama meel kale oo ku habboon,** haddii marka ay joogaan xuduudda ay iyagoo isticmaalaya helsenorge.no ay caddeeyaan in la tallaalay ama covid-19 ku dhacay xilli ka mid ah lixdii bilood ee

u dambeeyay. Booliska xuduudda jooga ayay shaqadiisa noqonaysaa in uu hubiyo xogta digitaalka ah.

– Hadda waxa qofka laga dhaafayaa hoteel karantiil haddii qofku marka uu joogo barta hubinta ee xuduudda, uu geli karo helsenorge.no oo tusi karo in la tallaalay ama  koroonahu hore ugu dhacay. Haddii qofku u baahan yahay in laga caawiyo sida loo gelayo halkaas, waxa caawin doona booliska.  Waraaqo la soo daabacay iyo dokumentiyo laga soo qaatay waddamo kale maaha wax la hubin karo in ay sax yihiin, oo markaas oo kale waa in qofku hoteel karantiil galo. Kani waa xal ku meel gaadh ah oo soconayaa 3-da Juun ilaa 11-ka Juun, ayay tidhi Monica Mæland oo ah wasiirka cadaaladda iyo heeganka.

Dadka hab digitaal ah, iyagoo isticmaalaya helsenorge.no, caddeeya in ay difaacan yihiin waa ay ka bixi karaan hoteelka karantiilka, waxaanay wakhtiga karantiilka ku dhammaysan karaan guriga. Wasaaradda caddaaladda iyo heeganka ayaa diyaarinaysa habka loo fulin karo arrintan, oo sida ugu dhakhsaha badan inoo faahfaahin doonta.

Xalkan ku meel gaadhka waxa uu ka bilaabmayaa khamiis 3-da Juun saacadda 12-ka maalinnimo, waxaanu soconayaa ilaa iyo inta shahaadada QR-ka leh diyaar noqonayso.

– Waxa kordhay dadka safarka gelaya, waxaana la filayaa in ay sii kordhaan maadaama wax-ka-beddelladan la sameeyay. Markaa waa muhiim in aan dadku xasuusnaadaan talooyinka weli jira ee ah in la iska dhaafo safarrada laga maarmi karo, iyo in haddii aad si kastaba doorato in aad safar gasho, waa inaad ku talogasho in safaf dhaadheer ka jiri doonaan xuduudda. Weli waa la hubinayaa dadka waddanka soo gelaya, tijaabada cudurka ayaa dadka laga qaadayaa isla markaana waxa xadidan hawlaha boolisku qaban karo, ayuu hoosta ka xarriiqay Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Muddada u dhaxaysa 11-kii Juun ilaa iyo marka shahaadaha weyni diyaar noqonayso bilowga Julaay, waxa dadka difaacan ee deggan Norway ee ka imanaya dibedda, loo oggol yahay in ay nidaamka waddaniga ah isticmaalan markay ka soo gudbayaan xuduudaha. Waxa la tusi karaa muuqaalka xaqiijinaya in qofku tallaalan yahay ama cudurku hore ugu dhacay.

**Dadka aan isticmaalin nidaamyada digitaalka ah iyo hubinta shahaadada**

Dadka aan isticmaalin nidaamyada digitaalka ah waxa ay isticmaali karaan nidaamka ku jira Helsenorge oo aad qof kale awood siin karto si uu kuugu soo saaro shahaadada koroonaha oo daabacan. Waxa la wadaa diyaarinta nidaam ay isticmaali karaan dadka aan isticmaalin moobaylka, ii-baadka ama kombiyuutar, si markaa loogu soo diro shahaadada koroonaha oo daabacan.

Waxa kale oo la diyaarinayaa farsamo ay isticmaali karaan kuwa hubinaya shadaadada koroonaha ee jooga xuduudda ama qabanqaabooyin ka dhacaya waddanka gudahiisa, iyagoo isticmaalaya QR ku yaalla shadaadada. Nidaamkan waxa la tijaabinayaa toddobaadkan.